

**Aruurinta Kaadida ee 24 saac
(Oo aan lagu darin wax kiimikooyin ah)**

Tilmaamaha:

Marka aad aruurinayso muunada kaadidada ah ee 24 ta saac waa muhiim inaad la socoto in baaritaankaan uu noqonaayo sax oo KALIYA haddii muunada aad aruurisay ay ka kooban tahay DHAMMAAN kaadidada kaa imaaay muddada 24 ta saac ah.

1. Si aad u aruuriso muunada kaadida ah waa lagu siiyay agabyadaan soosocda:
 - Weel aad ku aruuriso kaadida. **Dhig weelka meel aysan gaarin carruurta yaryar.**
 - Koofiyada lagu aruuriyo muunada ama waxaad koofiyada lagu aruuriyo muunada ku badeli karraa weel nadiif ah si aad munada kugu aruuriso. U wareeji kaadidada aad aruurisay weelka muunada ee 24 ta saac kadib mar walba ood kaadi aruuriso.
 - Xaashida tilmaamaha
2. Sida Loo Diyaariyo
 - Ha iskudayin inaad si toos ah ugu kaadiso weelka lagu kaydiyo kaadida muunada ah. Ku aruuri kaadida weel gaar ah oo nadiif ah ama koofida lagu aruuriyo muunada kadibna si taxadarleh ugu shub weelka kaadida lagu aruuriyo ee 24 ta saac mar kasta ood kaadi iska soo qaado.
 - Inta lagu jiro iyo kadib marka aad aruuriso dhig kaadida aad aruurisay meel qaboow ama geli firinjiyeerka. HA barafeyn.
 - Haddii kaadidu daadato ama uusan weelku sii hayn, fadlan wac dhakhtarka. Waxaa laga yabaa inaad u baahato inaad dib u billoowdo adoo adeegsanaaya weel kaadida lagu aruuriyo oo cusub.
3. Ku qor weelka kaadida lagu aruuriyo ee 24 ta saac magacaaga koowaad iyo kan saddexaad iyo taariikhda aad dhalatay.
4. Si aad u billoowdo aruurinta kaadida muunada ah, kaadi oo faaruji kaadi-haystaada subaxdii. **Iska tuur kaadida muunadaan** kadibna meel ku qoro taariikhda iyo waqtiga.
Taariikhda: _____ **Waqtiga:** _____
Sidoo kale weelka lagu aruuriyo muunada kaadida 24 ta saac, ku qor taariikhda iyo waqtiga aad billoowday
5. Aruuri dhammaan kaadida aad kaadiso 24 ta saacadood ee xiga. Aruuri kaadida muunada ah ee ugu danbeysa isla marka 24 saac laga joogo markii ugu danbeysay ee aad kaadisay adoon aruurin, sida kor ku xusan.
Weelka lagu aruuriyo kaadida 24 ta saac ku qor taariikhda iyo waqtiga aad dhameysay aruurinta kaadida. Aruurinta muunada 24 ta saac hadda way dhamaatay
6. Weelka aad kaadida ku aruurisay 24 ta saac ku celi mid kamid ah Xarumaha Adeega Bukaanka ee Adeegyada Sheybaarka OhioHealth maalinta aad dhameysay aruurinta muunada.

OGSOONOOW: Qaar kamid ah baaritaanada waxay u baahan karaan in lagaa qaado dhiig, marka aad soo celiso kaadida muunada ah ee 24 ta saac.